" WAX UUN BAY QARINAAYAAN "



# MA QARIN KARTID

Website:-Quurow.com
qoraa: Abdirahman Bahri
Email: A.bahri.cc@gmail.com

Danbiyada aan galno ma ahan kuwa naga Haraayo!

xitaan hadii aan aaso ama aan joojino so xasuushadooda

ma jiro qof ilaawi karo...

waa macquul inad is iloowsiisid... lkn waliga ilaawi maysid.

gaarahan xasuusaha nabarka nagu ah ee ku hareeraysan maskaxdena xanuun jinaayana dameerkeena

Cabdirahmaan Al-Baxri

**ma ahan wax haraayo...**

**Aargoosi..!**

# Go`aanka dowlada hoose!

Taleefonka guriga wuu dhacayaaa

waxuu ahaa nin ku jiray da`ada 50aadka waxuu u dhaqadaydhanka teleefonka dhacaayo si uu uqabto

"haa hello waa (cabdi rahamaan)..."

waxaa soo gaaray (cabdirahmaan) warka ku saabsan in la dumindoono guriga aabihiis ka dhintay ee ku yaala xaafadoodi hore kaas oo uga tagay walaalihiis sanado ka hor..shaqaalo ka tirsan dowladda hoose aya u sheegay in uu heeysto mudo labo isbuuc ah si uu uga qaadto alaabtiisa inta aan la burburin.

wuu u mahadceliyay shaqaalihii waxuuna u sheegay in uu la socodsiinayo dhaxal sugaasha kale

ka dib markii uu dhamaaday wacitaanki ka dhexeeyay asiga iyo shaqaalaha dowlada hoose waxuu la xiriiray walaalshiis (amiira) tasoo  ah da`da ku xigtay waxaana u buuxsaay bilo ka hor sanadkeedi 48aad waxayna maamule ku xigeeyn ka tahay midka mid ah iskuulada sare.

(amiira) waxay mobilka ka qabatay walalkeeda ka wayn

"hellow walaal ,seetahay, waana sidee xaalka qoskaada"

(cabdirahmaan):dhamaanteen waynu fiicanhay allah mahad leh , adiga xaalada iga waran iyo xaalka gabdhaada ... walaalahayna sideeyihhin ayagana

(amiira) :alxabdu lilaah..gabdhaxayga dhamaantooda way guursadeen.. walaalkeena (fahad)na waxuu bilaabay mashruuciisa u gaarka ah waxuuna ku fikirayaa inuu guursado waxuuna bilo ka hor u guuray guri uu kiraysay in kastoo aan ka diiday lakiin wuu ku adkeeystay.

(cabdirahmaan) (fahad) isagu hada ilmo ma ahan, waxuu ku dhawyahay da`da 40jirka

(amiira) :aniga aktayda kama wayno wali waxaan u arkaa walaalkayga iga yar

(cabdiraxmaan) :(ali) asna iga waran ?

(amiira): isaguna guriga wuu tagay waxuuna doortay inu la noolaado saxiibkiisa hadana asagu waxuu ku jiraa jaamacada sanadkiisii u danbeeyay e kuliyada caafimaadka..guriga sidaasa loogu kala tagay (asma)kaliya hada soo hartay iyadana ma siidayno doono ilaa laga guursado

cabdirahan isaga oo qoslaayo ayu yiri : iyadu waxay ku jirtaa marxalada dugsiga sare marka wax laga walwalo ma jiraan

amiira: iyadu waxay ahyd qofti ilasii joogtay ka dib markay gabdhahayga dhmaantood guursadeen iyo xitaa geeridii ku timid ninkeyga Allah u naxariiste...guriga waxuu noqday cilo iyaga la`aantood

cabdiraxmaan: waxyaabo badan aya dhacay aniga gadaashayda gaar ahaan moowduuca ku saabsan (fahad)(ali) ka tagitaanka guriga ay ka tageen

amiira iyado kaftamayso: hadaad na waydiin lahayd waad ogaan lahayd aqbaartooda

cabdirahmaan:wad ogtahay inan ganacsi ku mashquulsanahy wana wayay waqti aan ku arko xitaa qoys keyga ii gaarka ah

amiira: anagaba sidoo kale qoyskaada nahay...teeda kale aniga iyo walaalada waynu kulanaaa isbuuckasta dhmaadkiisa malinkaas jimcahana way ii imaadan wana wada qadeeynaa mar walibana adiga ayayna ikaa waydiiyaan waqti kasto

cabdiraxmaan: waan qirsanahay qaladkeeyga hada kadibna waxaan ku daadli doona sidaan u xoogin lahaa xiriirka dhexeena ah waana idinla soo xiriirin doona

amiira:aad ban ugu faraxsanahay inan maqalno hadalkaas

cabdiraxmaan; maanta waxaa ila soo hadleen shaqaalaha dowlada hoose waxaayna igala hadleen arinka gurigeeyni hore..

amiira si muruga leh ayeey u tiri: ma waxay go`aansadeen inay dumiyaan?

cabdiraxmaan; Haa maalmo kadib beey bilaabi rabaaan dumintiisa

amiira: aniga ma`ogi sabata aad uga ogaaltay arinkaas..inagu baahi uma qabno xogaa magdhow ah nololol maaleedkeena wuu wanaagsan yahay

cabdirahmaan: ma jirto sabab aan ku diidi karo arinkuna ma quseeyo lacag, waxaa jiro mashruuc way oo lagu hormarinaayo gobolka lagu na qurxinaayo si uu mashruucas u fulana waxaa la tirti doona dhamaan guryaha duuga ah o gurigeeyni hore ku jiro hadaan ogolaano iyo hadaan diidnana waa isku mid..xogaaga magdhowgana waa sheeg iska caadiya mana xumo runtii

amiira si waalac ka muuqdo ayay ku jawaabtay: dhamaan xasuusihi yaraanteeyni way baabi doonaan.. aadban uga xumahay

cabdirahmaan: fikrad baa igu soo dhacday kawan hadaan isugu nimaano gurigeeyni hore oo halkaas ku wada qadeeyno jimcaha intaan la dumin kadib na aan ka sheekeeysano xusuusihii yaraanteeyni

amiira si farxad ka muuqato ku jawaabtay: waa fikrad fiican runtii!

cabdirahmaan: adiga ama mid kamid ah walaalahay hano soo qaado wax waliba oo looga baahanyahay kulan kaas

amiira: waan lawada xiriiri doona waana la socodsiin doona iyaga..adigana walaal imoow halaas salaad jimco ka dib hana soo dib dhicin, runtii adbaan ugu xiiiso qabnaa arigtidaada

cabdiraxmaan: insha allah waan imaan doona.

waxaa lagaaray jimcihii waxayna shantii walaalo ku kulmeen guriga aabohood duuga ah kaaso ahaa..guryihii 90meeyadii ka hor la dhisan jiray kuna yaalay xafadoodi hore kaas oo leh deeyr wayn iyo saqaf furan waxayna ku fariisteen kuraas caag ka sameeysay dhexdoodana waxaa yaalay miis ka

sameeysan alwaax waxayna bilaabay inay ka sheekeystaan xasuusahoodi yaraata

amiira iyadoo miiska gacmaha saaranaysa: “allah u naxriisto waalidkeeyn waxeey ahaayeen kuwo naga celiya inan wadooyinka ku ciyaarno xitaa noo meey ogaal jirin inan banaanka guriga fariisano

cabdiraxman: isagoo koob shaaxa shubaanayo: anaga ayeey noo cabsanayeen sidaas bay nooga celinayeen inan u baxno dibada

fahad iasagoo fiirinaayo (cali) :ala kan maxuu aabo nagu diray!

cali: mar anagoo si dhumaalaysi ah banaanka ugu baxnay si aan kubad ugu so ciyaarno kadibna nalka dariskeena kuba ku dhacday ,qofkii aabo u sheeg so adiga ma eheen?

Fahad asoo qoslaayo: waxay ahay marki aan yaraa ee ka gudub waxaas hana soo xasuusinin sheekadaas dhamaantood way ku qosleen waxaay ahaayeen kuwo ka sheekeeysta xasuusahoodi hore oo dhexdooda midba midka kale is fiir fiirinaya waxaa la soo garaacay albaabka

(cali) isagoo kursigiisa kasii kacaya: “ugu danbeen qadadii way keeneen”

amiira: walaaga fiicnaa in cuno maqaaayad laga dalbo..aniga iyo (asma) ayaa cuno soo diyaarin karno

cabdiraxmaan: anaga halkaan waxan u joogna inan waqtigeena ku raaxeeysano oo sheekeeysano..ma rabo inan kala mashquulno

asma iyadoo qosleeyso: aniga waan kugu raacsanahay midaas!

Amiira: dabcan waa ku raacsantahay asaga wayoo waxaa doonaysaa inad sidaas uga badbaado hoosha jikada..ha dhawaato ama ha dheeraato jikadu waa tii aad gasho

asma iyadoo qosleeyso: waan fahmay ula jeedkaada lakiin waxaa lama huraana inuu ogaado ninka i guursan doono inan jiko u gali doonin

fahad:ninka kan adiga ku guursan doono waxaa wajib ku ah inuu fahmo wax badan

asma: maxaa kala jeedaane hadalkaas?

Dhamaan walaalihii waxay isagu tageen miiskii cunada oo yaalay jikada qolka ku xiga jikada ,xogaa markii la cunteeynayay (cabdiraxmaan) aya yiri hilibkaan aad buu u macaan yahay xagee ka keentay caliyoow

cali: suuqa xoolaha ayan ka keenay..saakay xili hore ayan u kalahay suuqa si aan neef sidaan u macaan

amiira: lakiin hilib badan malahan bee!

Cali asagoo qoslaayo: waxuu ahaa wan yar..wiilban ula dagaalmay si aan u helo wankan ugu danbeeyna waan ka guuleeystay

asma: maxaa wan dartiis dagaal ugu gashay?

Cali: wayoo waa wan yar oo misa hilib leh waana midka kaliye ee suuqa ku soo haray..wiil kuna waxuu doonayay inuu bixiyo lacag teeyda ka badan

fahad asaga oo eega (cali): yarkii aad u gacan qaaday adoo raalin galin miyaa isaga soo tagtay?

cali asaga oo dhoolacadeeynaya: maya maya gadaal ayan ka heshiinay waana is fahanay..asaga waxa uu raadinayay wan yar waana ka caawiyeey siduu ku heli lahaa! ilaa uu ka helay kana qancay

asma iyada oo qosleeyso: ugu danbeeyn waxaad noqoteen saxiibo

cali: xaqiiqda haa xitaa nambarada ayan kala qoraynay in mudana meesha ku sheekeeysanay

cabdiraxmaan si murugo leh : "waqtiga lala qaato qoyska waa wax aad u wanaagsan..runtii horay uma ugeen midaas la sheekeeysigiin waxaan ka heley dareen farxadeed waxaan rajeeynaa in dhaqaankaan wanaagsan uusan haked galin..kuna sii tarbiyeeno caruurteena hada waxaan rabaa inan caruurteeyda soo wado isbuuc danbe sidee u aragtaa (amiiroy)adiga? "

amiira iyadoo qosleeyso: maya walaal midaas ha sameeynin!..kulkeena isbuuclaha ah waa kan kaliya ee ka nasto buuqa iyo madax xanuun ka gabdhaheeyga..aniga waxaa ila wanaagsan inan maalin u kooni ah u sameeyno iyaga

fahad asagoo la kaftamaayo walaashiis ka wayn: nolosha qoyska ma sidaas dhan bay u daal badan tahay abaayo?!..guursa islahaa lakiin hadaay saas tahay kuma jiro

amiira iyadoo galaas agyaalo biyo ku shubanayso: waxba ha iga waydiin arkaas yaanan been ku sheegine

cali si jeesjees leh:ha isku dayin inad waxaas marmarsiimo ka dhigatid!..markaagi horeba waxba soomad wadidne.horta ma is muraayad ma isku eegta!

(Fahad) dharbaaxyo ayuu daanka kaga dhuftay walaalkiisa ka yar: naga aamus!

Asma si layaab leh: maxaa isku heeystaaan horta?

Cabdiraxmaan asagoo dhoola cadeeynaya: walaalayaaloo dhaqan kaan foosha xun kama waynaataan miya!

Amiira iyadoo biyo cabayso: muuqasaree ka waynaadeen kuwaan..caqliga waa ka ilmo

(cali) waxa uuka kacay meeshu fadhiyay waxuuna yiri: "alxabduli lahaah" wuuna iska dhaqaay

cabdiraxmaan si layaab leh: maxaa kugu dhacay? Xagee u kacday? Waxbo maadan cunine?!

Asma iyadoo hoos u qosleeyso: iskadaa mudo cunta kor fadhiyee!

amiira si walaac ka muuqdo: maxaa ku helay?..xaaladu waa sidee?..maxaa dhibsatay aya jira?

Cali asaga oo qoslaayo: maxaa idin helay?..is caatees ku jiraa..wax kale ma jiraan!

amiira: runta ii sheeg..maxaa kugu dhacay? Waan ku dhaaranayaa inanay jirin wax aan kaa qarinaayo

amiira: kama rumeeysay hadalkaan

cali asagoo fiirinaayo dhanka(asma): soo ma faraxsanid hada?!

Asma iyadoo o qosleeysa: haa dabcan!

Cali asigoo madixiisa u jeedinaayo dhanka walaashiis ka wayn:" i rumeeyso walaal ma jiraan wax kale oo aan ahayn inan miisaan keega hoos u ridaayo

cabdiraxmaan isaga  oo u ishaaraayo bariiskii uu kacay: horta dhameeyso cuntaada..mar kala is cateeneeye

cali gacantiisa o saaray calooshisa: waan dheeragsanay runtii

fahad asna wuu istaagay: alxabdulihii

amiira: adna xagee u kacday?! Maanta maxaa idin helay?1

fahad asago dhoola cadeeynaayo:maxaa dhici lahaa walsheeye!..waynu dheregnay

(amiira) waxay dhameeystiratay cuntadeedii iyadoo gunuunacaysa: sida shimbirihii intay wax u cunayaan markaasay ku leeyihiin waan dharagnay!

Asma,fahad iyo ali waxay u dhaqaaqeen dhankii jikada , iyagoo ku qoslaayo hadalka walaashood ka way lana yaaban sida aadka eh e uga walwaleeyso iyaga  waxaayna is weedaarsadan hadaladaan

fahad isago qoslaayo: ma ila aragteen sida ay walaalsheena nooga walwaleeyso?

(Cal) istiraashada isagoo gacamaha ku tirtaayo:

" wax dhiba kuma qabo aniga kaliya waxay isoo xasuusay sida ay hooyadeen nooga walwali jirtay allah u naxriistee..waxay ka dhaxay caadadaas hoyadeen"

(fahad) asagoo tubada biyaha gacmaha ku dhaqanaayo :

" aniga caadi uma arko walwalkaas hoyadeena waxyaabo badan ayeey noo diidi jirtay markaan yar yareen

(cali) waxuu u soo taagay istiraashadii walkiis: "maxay ahaayeen waxii laga celin jiray? Waxan caruurnimadeeni ku soo qaadanay sidii ugu fiicneed"

fahad afkiisa ayuu masaxay iyo gacantiisi wuxuuna istiraashadii miis meesha yaalay:

"aniga la iima ogolaan jirin inan la cayaaro saaxiibadeey"

cali: saaxiibada waxay ahaayeen saaxiibo xun waana ilaah mahdiis in hooyo iyo aabo kaa mamnuuceen la ciyaaristooda

fahad: wax wala iloowi karo ma ahayn farxadii aan ka heli jiray marki aan ku cayaaraayo luuqayada xafdiini hore

cali: hadaad wali u xiisaqabto inad wadooyinka iyo dariiqayda ku ciyaarto waad ku cayaari kartaa

fahad: maxaad kala jeeda hadal kaan?

Cali: waxaan arkay kubaadi yaraati aad ku cayaari jirtay oo dhextaala qolka hooyo..aniga ku jira jawi xasuus

fahad: kubadee ka hadloosa?..ma tii yaraantini waxaa hubaal ah inay duugoowday

cali: maya..kaliya waxay u baahantay in la aariyeeyo..nakeen aan soo qaadnee (cabdiraxmaan) aan ku qancino inuu nala ciyaaro asna

fahad: inuu (cabdiraxmaan) nala ciyaaro?..umaleen maayo inuu ogolaanaayo

labdii waxay u jihiisteen dhankii iyo qolka ay ku badu taalay..marki ay galeeyn qolkii (fahad) ba arkay kubadii wuuna soo qaaday waxuuna yiri:" kubaad wax yaabo badan ayay isoo xasuusinaysaa"

cali si layaab ka muuqdo: walee waa yaab!

Fahad waxuu eegay wajiga walaakiisa: maxaa jira?

Cali: saakay markii aan arkay kubada oo wali sideedi ah yaaba la dhaqaaqi kari wayay

fahad asogoo kubada kor u tuuraayo hadana qabanaayo:" waa ilaah mahadiis hadii aysan wali is badlin..nakeen aan raadinee waxaan ku aariyeeno!

Cali asigoo u farta ugu timaamayo meeshi kubada taalay saakay: warqadaasna waa maxay?

Fahad : warqad maaha ee waa sawir..

(cali) oo u dhawanaayo walaalkiis: sawir?!

Fahad isagoo si taxar leh u fiirinaayo sawirka:

"waa sawir bari horaa oo hooyo iyo aabo kula jiraan ardaaga guriga (cabdiraxmaan) iyo (amiira)..imisa sano ka soo wareegatay sawirkan"

cali: walalkeen cabdiraxmaan sawirkan markii laga qaaday waxu ahaa shan iyo tobon jir ..taas waxay la macno tahay in sawirkan xiligiisi laga joogo afartan sano ka badan

fahad isago qoslaayo: fiiri amiira sawirkeeda! Waxay ahayd mid aad u buuran oo timo qalloocan

cali isagoo dhoola cadeeynaya: haa.. waxaan filaa inay sideed ama sagaal jir ahayd xiligaas

cali oo gadiy sawirka: kumuu ahaa qofkii sawirkan ka qaaday?

Fahad: waxay u badan tahay inuu abti (saalax) qaaday..wakii jeclaa aaladaha casriga inuu isicmaalo xiligaas

cali isagoo u tilmaamaayo wax ka danbeeya sawirka walaashiis amiira : qofkaana yuu ahaa?

Fahad isagoo fartiis ku masaxaayo wasaq ku aadaneed wajiga qofka amiira ka danbeeya: " waa canug yar.."

cali: wajiigiisa maaha mid aan aqnee?

Fahad: haa..ma ahan qof qoyska kamida..

(cali) oo ku dhawaad labo daqiiqo ku dul fikiraayay sawirka: haa..waa saxan tahay

fahad: laga yabee inuu kamid yahay saxiibadeeni yariita ama dariska ba uu yahay

cali: ma kaftamaysaa?..miyaad iloowday sidii waleedkeen nooga ilaalin jireen inan dhex galno caruurta gaar ahaan caruurta dariska?

Fahad oo aad u eegaya sawirka wiilka ka daneeya walashiis: yuu yahay hee?..maxuuna sawirka ula galay iyaga?

Cali: hadiiba ay jirto cid xalin karto xalxiraalahan waa walaasheeyn (amiira) waayo waxay ahayd midda ugu firficoon caruurta xaafada markii ay ciyaarta iskuulka la ciyaareeyso ka hor intaan laga mamnuucin inay banaanka u baxdo..horta ma xasuusta sheekoyinkii ay nooga sheekeeyn jirtay xiligaas?

Fahad asgoo qoslaayo: haa runtii..walaasheeyn amiira waxay heeysan jirtay shahadooyin ay ku heshay daadeelkeeda iyo aqoonteedaba

cali waxuu ka qaaday sawirka gacanta walalkiis ku jiray isagoo dhoola cadeeynaayo:

nakeen aan aadne iyaga oo waydiine

labdii waxay u jiheesteen dhanka iyo walaalahood kale ilaa ay ka arkeeyn iyagoo walaalaha intii kale cabayaan shaax (amiira) ayaa (asma) kula talisay in ay u wanaagsan tahay in ay jikada gasho o cuna karintana barato inatay yartay si hadhow musaqbalka u anfacdo..markii uu arkay walaalkooda ka wayn iyagoo xagooda u soo socda waxuu ku yiri: xagee jirteen labadiina?

(Fahad) kobadii buu ku tuuray hortooday: waxaan joognay qolka hooyo iyo aabo

amiira si murug leh: aniga wali waan awoodi la`ahay inan galo qolkaas ka dib geeridii waalidiinteena..murugadii baa igu siyada waxaana u ooyaa sidii caruurta

(cali) waxuu u dhiibay sawirkii waxuu ku yiri fiiri bal waxaan soo helnay?

Amiira sawirkii bayka qaaday wayna fiirisay..waxayna biloowday inay gacanta afkaasarto oo iska ooyso..

asma waxay u dhawaatay walaasheed ka wayn taaso ahay mid ooyneeysa: sawirkaani waa maxay?

Fahad oo dhoola cadeeynaya:waa sawir ka hooyo iyo aabo oo xili hore laga qaaday

waxay (asmo) kala baxay sawirkii gacanta walaasheeda si xaamaasad leh: haa sax

|(cali) asogoo dhoola cadeeynaya: haa

(asma) iyadoo qosleeyso waa tuma gabadhan timaha qalloocan?

(Cabdiraxmaan) isoo ka qaadayay sawirka gacanteeda ku jiray: keen aan arkee..

(Cabdiraxmaan) dhoor ilbiriqsi ayuu eegay sawirka kadibna si murugo leh buu u dhoola cadeeyay waxuuna yiri:" maalmo qurux badan ayeey ahaayeen..sawirkan waxaa naga

qaaday abtigeen (saalax) oo watay kaamira cusub oo soo iibsaday kadib markii ladalacsiiyay waqtigaaas"

fahad: ma jiraa qof wax ku arkay sawirka?

Amiira iyadoo ilmada iska masaxeeysa: waan buurnaa waana ogahay marka muhim maaha in lagu mashquulo

cali: maya maya..wax kale yaa arkay

cabdiraxmaan isagoo sawirka aad u faahfaahinaya: maya..ma jiraan wax gooni ah oo ku arko sawirka?

Fahad waxuu usoo dhawaaday walaalkiis ka wayn waxuu farta ugu tilmaamay canug ka danbeeya sawirka amiira:"canugaan! ma jiraa qof xasuusta"

(cabdiraxmaan) isagoo la yaaban buu ku jawaabay: maya.. ma xasuusto

(amiira) oo kala baxaday sawirka gacanta walaalkeed (cabdiraxmaan):keen aan arkee..

fahad: aniga iyo (cali) waxaan aaminsanahay inaa tahay qofka kaliya ee aqoonsan karaa wiilka ka danbeey

amiira iyadoo eegeeysa madaxa ruxeeysa si diid mo ka muuqato: maya..horay uma arag..

cali: sideed u soo xasuusan wayday?..yuu yahay wiilkan? Maxuuna sawirka idin kula jiraa?

Cabdiraxmaan: moowduucan aftan sano ka badan ka soo wareegatay..maxaa ii waydiinaysaa xiligaan?

Fahad: moowduuce?

Amiira si caro ka muuqato: moowduuca sawirka!

Fahad isagoo la yaaban carada walaashii:

"wax mowduuca ma jiraan..kaliya waxaan waydiinay wiilkas qofku yahay maxaa yeelay.."

cabdiraxmaan isagoo ka istaagay meeshu fadhiyay: waan soo xasuustay..waxaan soo xasuustay inan ballan muhiim ah lahaa..waa ku mahadsantahay qadada noo sameeysay..hadana waa tagay waxaa inoo balana jimcaha xiga guriga amiira aan isugu nimaano

(amiira) iyada waxay raacday walaalkeed: ina wadi aniga xitaa balan baan leeyahay

(cabdiraxmaan) waxuu ku yiri (asma) mana raacaysaa mise walaada ayad la soo labanee

asma: iyadu way kacday: maya..adiga ku raacay walaal bari baa imtixaan leeyahay marka waxaan rabaa inan isisii diyaariyo oo caawana xili hore seexdo

fahad aad buu u yaabay:xagee isu wada raacdeen dhamaantiin?!..

cali yaaban sida (fahad): haa..mxaa idin helay? Ma wax idinba idinku dhahay?

Cabdiraxmaan isgoo dhoola cadeeynaayo: maya lakiin xaqiid waxaan soo xasuustay inan ballan la lahaa mid ka mid ah ganacsatada

fahad oo amiira eegya: haye adigana?

Amiira iyadoo gashanaysaa cabaayadeedi :"anigaba sidoo kale waxaa isugeeyso oo labalan sanaa saxiibteey o suuqa isu raaci rabnaa..ha ilaawina inaad albaabka xidhaan markaad baxaysaan.."

asama:walsheey ma soo qaadaa shaaxa iyo koffeega

amiira waxay kadaba baxday walaalkeed ka wayn waxay na tiri iyadoo albaabka lugta ka sii bixi naysa: :"maya..uga soo tag walaaladaa ha isku dajiyaane.."

dhamaan way baxeeyn waxayna ugu tageen guriga (fahad) iyo (cali) kuwaaso la yaaban sida kadis ka ah ee ku baxeen.

# xasuusu ina mudaayo

"waxaa laga yabaa inay wax qarinayaan.."

## Cudur daarasho

runa ahaantii ma jecleen inan sheekada idinka kala jaro..se waxaaan idinka ballan qaadayaa inaan idin idin soo dhameeystiri doona sida ugu dhaqsiyaha badan.

Comment:

sheekadan waxaan ku qoray afsoomaali iska fudud oo anaan u baahneed in aad ereyada qaar aad ula laabato qaamuuska.

Codsi agtaada ka yar:

Akhristayaashayda sharafta leh waxaan ka codsanaya inad ila wadaagtaan wixii talo iyo fikir ah ee ku saabsan sheekado faneedan..

Xasuusin: sheekadan qeeyba heeda xiga waxaan si maalinla ah ugu soo daabici doona

websise keena: www:quurow.com laga bilaabo 10ka bisha nov ee isla sanadkaan

igala soo xiriir: A.bahri.cc@gmail.com